

Wargeyska Mountain View

Febraayo 3, 2016

Qamiis, Febraayo 4.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:15 p.m.

Sabti, Febraayo 6.....Tartanka Chess ee Dilworth, 9:00 a.m.

Fariinta Agaasimaha

Waxaa iminka noo dhamaaday imtixaankena qaboobaha DIBELS todobaadkii la soo dhaafay. Arday badan ayaa horumar ka gaaray akhriska, imtixaankii la soo dhaafay kaddib. Waxaan u mahad celineynaa ardaydena iyo macalimiintooda bacdamaa ay si wanaagsan ugu shaqeyeen halkaan dugsiga. Waxaa kaloo nala jooga Miss Cheryl iyo Miss Sena, iyo sidoo kale tababareyaal badan oo ka tirsan Utah Reads, kuwaasoo arday badan ku kaalmeeyay in ay horumar ka gaaraan akhriska sannadkaan. Yaan la iloobin aqoonyaanadana xanaanada ee macalimiintena xanaanada iyo ardaydena ku kaalmeeya xoojinta xirfadaha akhriska.

Waxaan kaloo u mahad celineynaa waalidiintena oo hubiya in caruurta waqti geliyaan akhriska guriga maalin kasta. Ardayda wax akhrisata ugu yaraan labaatan daqiiqo maalin kasta, dibadda dugsiga, waxay in badan ku guuleysan doonaan akhriska, waxay noqdaan akhristeyaal iyo barteyaal marka loo fiiriyo asxaabtooda wax akhrisata in ka yar labaatan daqiiqo halkii maalin. Caruurta waxay wax bartaan in badan marka ay wax la akhristaan ama wax u akhriyaan qof kale Marka qofkaas noqdo waalid ama qof weyn ay ku kalsoon yahiin, waxay kaloo ogadaan in qofka weyn daneeyo noloshooda ku saabsan barashadooda akhriska. Waad ku mahadsan tahay in aad wax u akhrisid cunugaada, in aad wax la akhrisatid, iyo in aad dhageysatid cunugaada oo wax akhriyo. Waqtiga aad gelisid waa wax aad gelisay waxbarashada iyo guusha uu gaaro cunugaada mustaqbalka.

Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maalinta Talaadada, Febraayo 2, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Haddiyadda, Macmacaanka, iyo Hawlaha Dibadda

Casumaadyada xafladaha maalinta dhallashada iyo hawlaha kale, aan la xariirin munaasabadaha dugsiga, waa in la qabto saacadaha dibadda ka ah dugsiga. Tani waxay ardayda aan la casumin ka ilaalin doontaa in dareenkooda wax soo gaaro. Dugsiga waa la keeni karaa macmacaanka (loogu talagalay maalmaha dhallashada, maalmaha khaaska, iwm.) hase ahaatee waa in horay ruqsad looga qaato macalinka, lana keeno qiyaas ku filan fasalka oo idil. Waxaa kaloo lagu tallinaa in macmacaanka ahaadaan kuwo laga soo iibiyay dukaan oo mid-mid loo soo duubay.

Tartanka Chess ee Dugsiga Hoose Dilworth

Tartanka chess waxaa lagu qaban doonaa Dugsiga Hoose Dilworth maalinta Sabtida, February 6, laga bilaabo 9:00 a.m. Waa casuman yahiin dhamaan caruurta ku jirta darajooyinka xanaanada ilaa darajada sagaalaad. Khidmadda lagu galo tartanka waa \$15. Si leysu diiwaangeliyo ama si aad u heshid macluumaad badan, booqo utahchess.com, dilworthchess@gmail.com, ama wac telefoonka (210) 865-5429.